

# Diiwaanka Warbixinta Rasmiga Ah

Fahamka ilaha dhaqaalaha haweenka barakacayaasha ah iyo horumarinta xiriirka dhaqaale ee noloshooda magaalada iyo baadiyhi ay ka soo barakaceen.

## Dulucda:

Labadii sano ee la soo dhaafay, Soomaaliya waxa ay noqotay mid laga hadal hayo caalamka, abaaro iyo amni darro soo noqnoqday ayaa dhaliyey in malaayiin qof oo u badan haween iyo carruur ay u barakacaan magaalooinka halkaas oo ay ku darsamaan malaayiin kale oo ka barakacay dhibaatooyin iyo musiibooyin horey u dhacay. Abuuridda xal u sahlaya haweenka inay naftooda iyo qoyskoodaba ku filnaadaan iyo dhisidda xiriirka ganacsi ee miyiga iyo magaaladaba waxay u baahan tahay in lala tashado haweenka barakacayaasha si qoto dheerna loo fahmo noloshooda.

## Shaqada

**Loo Wakiishay: The Building Resilient Communities in Somalia (BRCIS) Consortium.**

**Mashruuca:** USAID Scaling Solutions in Somalia

**Ujeedo:**

In la daraaseeyo nolosha iyo nolol-maalmeedka haweenka barakacayaasha, iyo in la fahmo xiriirka suuqa ganacsiga iyo miyiga ee haweenka; iyo in la wada dajiyoo xalal ganacsi oo horumarin kara nolosha, nolol-maalmeedka, iyo dakhliga haweenkan.

**Hannaanka:**

Hannaanku wuxuu noqonayaa wada-naqshadeyn saddex wajile ah oo ay u horreysa sahamin, ayna xigto cilmi-baarlis qoto dheer oo laga wada qeybgalo, laguna soo gunaanado aqoon-is-weydaarsi saddex maalmood ah oo lagu wada qorsheynayo xalalka.

**Ka qaybgalayaasha:**

39 ka mid ah haweenka barakacayaasha ee ka mid ah kooxda iskaashatada ee deggen magaalada Baydhabo iyo Barwaaqo, 22 ka mid ah saamileyda suuqa ganacsiga, iyo 18 ka mid ah maamulka deegaanka iyo saamileyda kale.

***Inta ogaalkeenna ah, howshani waxay ka mid tahay hababka talagelinta bulshada ee ugu ballaaran ee lagu qabto Soomaaliya.***

## Natiijjooyinka cilmi-baarista:

Tirakoobka dadweynaha:

Inta ugu badan xubnaha kooxda iskaashatada ee badankood ku nool xeryaha barakacayaasha ee magaalada Baydhabo iyo Barwaaqo waxay yimaadeen xeryaha barakacayaasha kahor abaartii dhawayd ee 2021-23. Saddex meelood meel waxay ka yimaadeen deegaanno ka tirsan degmada Baydhabo; Intooda kale waxay ka yimaadeen degmooyin kale oo ka mid ah gobollada Baay iyo Bakool. Marka laga reebo 4 qof, intooda kale wax ma akhriyaan.



Kala bar ayaa aaminsan inay yihii barokacayaal; inta kalena waxay isu haystaan inay 'dib-u-dageen' ama ka mid yihii 'bulshada deegaanka'.

#### Milkiyada Dhulka:

Saddex meelood meel ka mid ah xubnaha iskaashatadu waxaa khasab lagaga raray (eviction) goobihii ay degenaayeen, laakiin intooda badan waxay NGO-yadu ka caawiyeen helitaanka baahiyaha aasaasiga ah iyo in ay ka taageerleen sidii ay u heli lahaayeen dhul ay degaan, haddana waxa ay niyad sami u dareemayaan bulshadooda. Qiyaastii kala bar ayaa beerta in yar oo cunto ah ama guriga ku dhaqda xoolo, laakiin kulligood waxay jeelaan lahaayeen inay helaan dhul weyn oo leh carro ku wanaagsan beerashada.

#### Xiriirka miyiga:

Xiriir adag oo ay yeeshaan haweenka barakacayaasha ah iyo miyiga ay asal ahaan ka soo jeedeen waxaa abuura arrimahan soo socda: la noolaanshaha qaraabada (sayga, waalidka, walaalaha iyo ehelka kale ee miyiga jira), milkiyada ama lahaanshaha dhul ay degaan, heshiis dhul-berashoo oo ay helaan, haysashada teleefanada gacanta iyo isticmaalka lacagaha danabaysan. Wawaase yareeya xiriirkas arrimahan soo socda: amni darro ka jirta miyiga, masaafada oo dheer, helista gaadiidka oo yar, iyo jid xumo (gaar ahaan xilliyada roobabka), iyo qiimaha kaarka ku hadalka oo sarreeya.

Kala bar ka qaybgalayaasha daraasadda waxay qorsheyneyaan inay sii joogaan magaalada Baydhabo; barka kalena waxa ay qorshayneyaan in ay wakhtigooda u kala qaybiyan ku noolaashaha miyiga iyo magaalada. Arrimahan soo socda ayaa dhiirigelin wanaagsan u ah haweenka doonaya in ay sii joogaan magaalada: lahaanshaha dhul, hab-noolaansho xasiloon, amni, iyo helista adeegyo wanaagsan.

#### Nolol-maalmeedka:

Badi haweenka ku jira iskaashadatada, oo markii horena ahaan jirey beeralay ama xoolo-dhaqato, waxay hadda nolol maalmeedkooda ka raadiyan ganacsyo yaryar, sida iibinta khudaarta, badarka, iyo dhuxusha iyo qoryaha kuwaasoo aannu bilaabitankoodu dhib badnay kharashaadkooduna yar yahay ahna waxyaabo dadku aad ugu baahan yihii haseyeeshee uu macaashkoodu aad u hooseeyo. In badan oo iskaashatada kamid ah ayaa kala bedela noocyada badeecadaha ay iibiyaaan waxayna iskugu jiraan badeecadahaasi kuwa miyiga oo laga keeno deegaannada dhowdow iyo badeecadaha la soo dhoofiyoo sida bariiska, baastada, sonkorta, milixda, caanaha booraha, waxyalah la isku qurxiyo, saabuunta, dharka, iyo kabaha. Qaarkood ayaa ka faaideysta aqoonta ay u lahaayeen deegaanada miyiga ahaa ee ay asal ahaan ka yimaadeen alaabahana kasoo iibsada suuqyada iyo ganacsatada deegaanada miyiga alaabaha geeya.

Xubnaha ka tirsan kooxda iskaashatadu (SHG) waxay aaminsan yihii inay yihii ganacsato wanaagsan lehna xirfad ganacsi iyo awood ay ku maareeyaan dhaqaalaha ganacsiga oo ku dhisan kartidooda suuq-geynta iyo adkeysi ay u leeyihii caqabadaha.

- Haweenka waxaa dhiirigeliya oo asal u ah dadaalkooda rabitaanka ay rabaan in ay ku filnaadaan baahiyaha noloshada caruurtooda iyo xubnaha kale ee qoyskooda. Intooda badan waxay ku shaqaystaan guryahooda meelo u dhow halkas oo ay u fududahay inay ka warqabaan guryahooda caruurtoodana daryeelaan. Qaar kale oo haweenkan ka mid ahna waxay ku shaqaystaan suuqyada magaalada halkas oo ay ku haystaan macaamiil ku xiran ganacsigooda.

- Halka haweenka ku nool xeryaha barakacyasha ay ganacsigooda ku bilaabin maalgelino yaryar oo ay qoyskooda ka helaan, ganacsatada waaweyn (dukaanleyda) waxay ganacsigooda kor ugu qaadaan maalgelinno ay ka helaan Ha'yadaha aan Dowliga ahayn (NGO), iyagoo u soo dhex maraya kooxaha iskaashatada (SHG).
- Inta badan xubnaha iskaashatadu waa isha dhaqaale ee ugu weyn qoysaskooda. Saddex meelood meal keliya ayaa aaminsan in hab-nololeedkoodu yahay mid xasiloon, halka saddex meelood laba ka mid ah si joogto ah u daboolaan baahiyaha aasaasiga ah ee qoyskooda.
- Taleefannada gacantu waa aalado lafdhabar u ah ganacsiga. Telefoonada gacantu waxa ay kooxda iskaashatada ka caawiyaan inay la socdaan isbedellada qiimaha alaabta ee suuqa, in ay dalabka alaabta ku adeegsadaan, iyo in ay u adeegsadaan in lacagta loogu soo diro ayaguna ku diraan.

## Helida Maalgalinta

Caqabada ugu weyn ee ay wajahaan haweenka barakacyasha iyo ganacsatada kale ee deegaanka ayaa ah in aysan heli karin lacag ay ganacciga ku bilaabaan ha ahaato deyn ama fursado kale ee maalgelin. In kastoo ay jiraan adeegyo maaliyadeed oo ay bixiyaan bangiyada iyo hay'adaha la mid ah (sida qardu xasan, murraabaxada, iyo maalingalnadda yaryar) haddana waa kuwo kooban oo aysan fursad u helin in badan oo dadka ka mid ah. Xiriirka ay kooxda iskaashatadu la leeyihii bangiyada ayaa si tartiib tartiib ah u sahlaya in xubnaha iskaashatadu ay heli karaan maalgalin rasmi ah. Laakiin mida ugu badan oo ay si dhow u maamulaan xubnaha kooxda iskaashatada iyo guud ahaanba suuqa dhaqaale ee miyiga-ijo-magaalada ayaa ah kala amaahashada lacagaha ee dheddooda ah.

**Kooxda Iskaashatada (SHGs).** Xubnaha kooxda iskaashatada ayaa u isticmaala kaydkooda iyo amaahda in ay kaga dabaalaan khataraha aan la sii saadaalin karin ee uu wato ganacsigu, iyo inay ku maalgashadaan ganacsiyada. Marka laga soo tago faa'iidata dhaqaale, xubnaha kooxda iskaashatada ayaa kala faa'iida dhiirrigalin, wax kala barasho, is-caawin, wadaaga fursadaha, sidoo kalena ka wada sheekeysta xogta suuqa. Mararka qaar waxay isku noqdaan damaanad marka ay dayn qaadanayaan, waxayna isku xiraan kuwa badeecadaha keena. Afartaan koox iyo xubnaha ka tirsan ayaa si wadajir ah uga qayb qaata arrimaha bulshada lagu taageerayo.

## Nidaamka Suuqa

Abaaraha awgood iyo magaaloooyinkii oo aad loo soo dagay awgood waxaa sii badanaya iibsiga, badeecooyinka 'miyiga' oo laga soo iibsado baadiyaha ku hareereysan magaaloooyinka. Waxaa sidoo kale qeyb muhiim ah ka ah xiriirka suuqa miyiga-ijo-magaalada waa gadashada badeecooyinka dibeda laga keeno ee lagu iibyo suuqyada Baydhabo. Wax kala iibsigani wuxuu inta badan ku suntan yahay in aan wax la qorin waxna laga doodin.

- Qaar ka mid ah kooxda iskaashatada marka ay badeecadaha ka keenaan miyaga waxay magaalada dib uga iibsadaan alaab. Xubnahan intooda badan waxay macmiil u yihii hal ganacsade, iyagoo ahmiyada siinaya daacadnimada iyo aaminaada ganacsadaha. Arrintan waxay sahashay inay yeeshaan xiriir fiican alaabtana ku kala iibsadaan qiime macquul ah, isla

markaana deyn ka qaataan. Gaadiidleyda ay ka mid yihiiin bajaajta (rickshaw) iyo wadayaasha mootooyinka ayaa dadka iyo badeecadahaba u kala qaada miyiga iyo magaalada iyo sidoo kale daafaha magaalada Baydhabo.

- Macaamiisha haweenku waxay u badan yihiiin deriska kula nool xaafadda ama xeryaha iyo dad ka imaada miyiga.
- Qaar ka mid ah kooxda iskaashatada (SHG) ayaa wadashaqaysta ayagoo soo wada iibsada badeecadaha, soo wada rarta alaabta, sidoo kalena qeybsada kharashka dulaalka..

## Caqabadaha

Werwerka ugu badan ee xubnaha iskaashatadu (SHG) qabaan maaha inay dabooli kari waayaan baahiyaha aasaasiga ah ee qoysaskooda iyo inay ganacsiyadoodu ka xidhmaan.

Arrimahan waxaa saameeya abaarta, isbedbedelka suuqa, isbedbedellada baaxadda leh, isbedbedelka rabitaanka macaamiisha, daadadka, iyo kuwo kale oo badan. Waxaa ka mid ah caqabadaha kala duwan ee haweenka barakacayaashu wajahaan kuwan soo socda: aqoonta akhriska iyo tan xisaabta oo hooseysa, xirfadooda maaraynta ganacsiga oo aan sareyn, hantida raasamaalka iyo amaahda oo kooban, adeegyada ganacsiyida Kaaba helistooda, ururada bulshada iyo kuwa suuqa ka mid noqoshadooda, iyo kaabayaasha dhaqaalaha oo liita. Waxay sidoo kale haweenku walaac ka muujiyeen xaalada amni ee magaalada oo aan daganeyn iyo nabadda miyiga oo aan iyadana cagaha si fiican ku taagnayn. Taasi waxay adkaysaa u kala safridda magaalada iyo baadiyaha waxayna sidoo kale khatar galisaa qoysaskooda.

*In kasta oo dad badan oo xog-ogaal ahi ay si cad u sheegeen dowrka ku tiirsanaanta gargaarka, haddana waxaa si fiican uga soo baxay daraasaddan heerka ay gargaarka lacagta caddaanka ahi ka hortagtay burburka dhaqaalaha iyadoo dabooshay baahida qoysas badan.*

Guud ahaanba caqabadaha haysta xiriirka ganaci ee miyi-magaalo waxaa ka mid ah amni-xumo, masaafu aad u dheer, iyo tayada jidadka oo liidata. Marka la eego baaxadda amaahda ee ganacsiga, dhammaan dhaqaalaha gacanasiga miyi-magaalo ayaa ku dhisan wax is-amaahin heerkeedu sarreeyo taas oo ka dhigaysa mid u nugul suuq-xiranka dhaqaalaha.

## Guulaha

Guulaha ugu waaweyn ee haweenka waxaa ka mid ah awoodda ay u leeyihii inay caruurtooda siiyan cunto nafaqo leh, kuna dadaalaan badbaadintooda iyo waxbaristooda; sidoo kale lahaanshaha dhul iyo guri; amni iyo in ay dareemaan ka mid ahaanshaha bulshadooda; iyo bilaabista ama sii wadista ganacsiyadooda; iyo wax kaydsashada.

## Talabixinnada cilmibaarista

<b>In la kordhiyo shabakadaha haweenka</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>■ Isku-xidh-ka dumarka barakacayaasha ah iyo kooxda iskaashatada ah (SHG).</li><li>■ Hirgalinta madal(lo) ay haweenka barakacayaasha ah kula kulmaan suuqleyda kale, si ay madalladaan barkulan ugu noqdaan kooxaha iskaashada,</li></ul>
--	---

<b>In la bixiyo taageero ganacsi oo dheeraad ah</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Baarista suurtogalnimada kicinta ama dardargelinta ganacsiga.</li> <li>Ku dhiirigelinta haweenka ku nool barakacyaasha inay xiriirkooda miyiga u isticmaalaan sameyn ta nolol-maalmeed.</li> <li>Hirgalinta tababaro iyo la talin joogto ah .</li> </ul>
<b>In la Maalgeliyo beeraha ka ag dhow magaaloo yinka</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Horey ayaa loo qorsheeyay qodobkaan wuxuuna qayb ka yahay Mashruuca Scaling Solutions.</li> </ul>
<b>In la xoojiyo adkeysiga iyadoo loo kobcinayo xiriirk gaancsi ee miyi iyo magaalo</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In si taxaddar leh loo badalo dhagaalah ka tiirsan gargaarka bini'aadantinimo looguna badalo dhaqdhaqaqa suuqa caadiga ah.</li> <li>In la balaariyo adeegyada maaliyadeed iyo tababarrada la xiriira suuqa miyigayo-magaalada iyo saamileyda xubnaha ka ah silsilada iyo kooxaha kale ee badanaa la illoobo.</li> <li>La shaqeynta FSP-yada (bangiyada) si ay u baaraan hal-abuurrada la xiriira hababka maalgelinta cusub ee u sahli kara haweenka barakacyaasha ah in ay helaan taageero maalgelin ee ku aada ganacsi ku dhisan suuqa miyiga.</li> <li>Horumarinta adeegyada aasaasiga ah iyo wax soo saarka deegaananda baadiyaha ah si loo yareeyo barakaca mustaqbal ka.</li> <li>In la baadho maalgashiyo iyo iskaashiyo fududeeya isu-socodka badeecadaha ee miyiga (sida, badeecadaha dibadda laga keeno).</li> <li>In la kala saaro goobaha 'miyiga' iyadoo lagu salaynayo sifooyinka juqraafiga. Kadibna la qorsheeyo hirgalinta mashruuc tijaabo oo laga sameeyo miyig u dhowdhow magaaloo yinka.</li> </ul>
<b>In la xoojiyo dowladaha hoose</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la xoojiyo dowlada hoose si loola tacaalo caqabadaha aan la xalin karin sida amni darrada iyo kaabayaasha jidatk ee liita.</li> </ul>
<b>In barnaamijyada deeq-bixiyeyaa sha hogaaminayaan loo badalo mashaariic muddo dheer socda.</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In dhisida kalsoonida u dhaxeysa barakacyaasha iyo suuqleyda la siiyo waqt ku filan, iyo in xisaabta lagu darsado caqabadaha barakacyaashu wajahaan.</li> <li>In dhammaan barnaamijyada lagu daro hababka soo kabshada tiiraanyada iyo xusuus xun-xun ee ka dhasha barakaca.</li> </ul>

## Aragtida la wada hindisay

Aqoon-is-weydaarsiga wadajirka ah ayaa isu keenay xubnaha iskaashatada (SHG), bixiyeyaa sha adeegga maaliyadeed iyo tababarrada, iyo wakiillada dowladda iyo kuwa aan dawliga ahayn si ay isu bartaan ugana doodaan natijada cilmi-baarista kadibna si wadajir ah u falanqeeyaan xalka suurtagalka ah ee lagu horumarinayo nolosha, hab-nololeedka, iyo dakhliga haweenka kasoo jeeda barakacyaasha Baydhabo. Kooxdu waxay si wada jir ah u hindiseen afar fikradood:

<b>Silsiladaha saamileyda beeraha</b>	<b>Horumarinta ganacsiga iyo kala-duwista nooca iyo hababka ganacsiyada</b>
<ul style="list-style-type: none"> <li>Horumarinta fursadaha haweenka barakacyaasha ah si ay uga qayb qaataan habaynta iyo baakadaynta cuntooyinka maxaliga ah: Boorashka, Soorta, Canjeerada, Burka, Macsarada, iyo Lawska.</li> <li>Hirgalinta iibsashada mishiinnada wax-shiida iyo qalabyada kale.</li> <li>Wax ka qabashada kharashaadka korontada ee sarreeya iyada oo loo</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la sameeyo sahamin ku aadan fursadaha ka jira suuqa si ay ugu suurtagasho haweenka ganacsatada ah ee kasoo jeeda barakacyaasha inay u horimariyaan korn ugu qaadaan dukaamadooda oo ay kala duwanaan karaan badeecadaha ay gadaan.</li> <li>Shirkadaha ganacsigu waxay si ballaaran u horumarin karaan dhagaalah gacanna ka geysan karaan raasamaalka bulshada.</li> </ul>

marayo maalgelinta qaboojiyeyaasha ku shaqeeya tamarta cadceedda iyo baabuurta qaboojiyaaasha leh.	▪ Dhiirigelinta haweenka barakacayaasha ah si ay u qabtaan hawlo ganaci oo kala duwan kuwaas oo ka jawaaba baahida joogtada iyo mida kordheysa ee macaamiishooda ee laga sameyn karo faa'iido badan, sida rootiga, iibinta caanaha geela, harqaanka, iyo dukaamada dharka / moodada.
<p><b>Adeegyada maaliyadeed iyo tababarrada</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Hagaajinta helitaanka dhaqaalaha raasumaalka ah iyo deymaha lagu bilaabo ganacsiyada iyo kasbashada xirfadaha ganacsiga, akhris-ijo-qoraalka, iyo tababarrada xisaabinta ganacsiyada iyadoo la ballarinayo adeegyada jira iyo la sameeyo iskaashiyoo baara xalal cusub.</li> <li>▪ Taageeridda dhaqaalaha-kabida-bulshada (safety net programs) ayaa wali loo baahnaan doonaa si ay u sahasho haweenka inay dib u soo kabtaan xilliyada ay dhacaan muusiibooyinka dabiiciga .</li> </ul>	<p><b>Xarumo ujeedooyin badan leh</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Hirgalinta goobo caruurga lagu xanaaneeyo sida kuwo Save The Children kuwaas oo bixiya xanaano caruur .</li> <li>▪ Hirgalinta hannaan loogu talagalay isku xirkka iskaashatada dhexdooda iyo suuqleyda kale.</li> <li>▪ Hirgalinta goobo loogu talagalay kooxaha iskaashada loona adeegsan karo qabashada tababarrada iyo waxbarashada akhrisk iyo qoraalka.</li> <li>▪ Waxaa suurtogal ah in goobahaas laga sii kireeyo kooxo iyo ururo kale si dakhli looga dhaliyo.</li> </ul>

### Natijjooyin kale oo kasoo baxay aqoon-is-weydaarsiga

1. Warbixinta ka hadleysa Nolosha Haweenka, Hab-nololeedka, iyo Isku-xirkka;
2. Warbixinta iftiimineysa baaris lagu sameeyey xiriirkka miyi-ijo-magaalooyo;
3. Warbixinta muuqaallo leh oo ka hadleysa is dhengalka ganacsatada haweenka ee Baydhabo.